

XUKUUMADDA SOOMAALIYA

Xeerka Maamulka 9 Abril 1959, lamba. 63 rep.

Kirada ku meelgaarka lootada dhul dhismo oo ah demanyaale kuna yaalla Kismaayo oo la siiyay Shirkadda AGIP

WASIIRKA ARRIMAHA MAALIYADDA

WASIIRKA

Marka uu arkay Xeerka 7 Jamhuuriyadda Dalayaaaniga 4 Nofember 1951, lr.1301 oo lagu ansixiyaya laguna fulinayo Heshiiska Wasaayadda Dalka Soomaaliya;

Marka uu arkay Xeerka 7 Maajo 1956, lamba. 1 (Dhismaha Xukuumadda Soomaaliya);

Marka uu arkay dekereetda 31 etember1956, lamba. 99 rep (Wakiilnimada la siiyay Wasiirka Arrimaha Maaliyadda awoodda u sugnaatay Maamulaha arrimaha ku saabsan ruqsadaha dhismaha;

Marka uu garowsaday in dhaqangalka Amarka lamba. 5 ee 12 Abril 1950, ay waqtiga xaadirka yihiin kuwo la dabbaqi karo, iyagoo la jaanqaadi kara qod. 14 ee Heshiiska Wasaayadda, shuruucda nidaaminaya ruqsadaha dhismaha ee ku jira Xeerka Dhulka Eritrea, oo lagu meelmariyay r.d. 7 Feb. 1926, lamba. 269, kaaso lagu fidiyay Soomaaliya r.d. 17 Maarso 1938, lamba. 380;

Marka uu arkay codsiga ay soo gudbisay AGIP S.p.A ee Muqdisho taariikhda 8 Julay 1957 si loo siiyo ulajeeddo dhismo Lootada dhul wareegiisu ku fidhiyo 1792mq oo ku yaalla Kismaayo (Degmada Kismaayo) si looga dhiso kaalin lagu qaybiyo shidalka iyo saliidaha oo ay wehliyaan keydka shidaalka iyo saliidaha;

Marka uu arkay codsiga labaad oo ay soo gudbiyaan Shirkadda la soo sheegay ee ku taariikhaysan 27 Setember 1958 taasoo lagu weydiistay kiro ku meelgaara dhulka la soo sheegay oo diyaar u ah in hawlaha ruqsadda ay sidooda u socodaan si loo bilaabo hawlaha dhismaha kaalinta;

Marka uu tixgaliyay in fulinta ruqsad bixinta dhismaha dhulka la siiyo ajaanibta goobaha ka baxsan Muqdisho ay ku xirntahay in uu oggolaado Golaha Xeer-dejinta taaso qaadanaysa waqti dheer hawl fulinteeda;

Markuu tixgaliyay baahido loo qaba in si deg-degga hawsha dhismaha kaalinta loo fuliyo si loogu qaybiyo shidaalka iyo saliidaha oo ay wehliyaan keydka shidaalka iyo saliidaha Kismaayo;

WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA

Waxaa la oggolaaday oo la fulinaya qandaraaska kirada lamba. 10244 ee Diiwaanka tariikhada 21 Maarso 1959 laga sameyay Nitaayada Ciotolo Mario, lagu diiwangeliyay lamba. 212 ee Qoraallada Rasmiga Cadadka IX ee taariikhda 24 Maarso 1950 oo dhexmaray Xukuumada Soomaalida AGIP S p A oo ku saabsan kirada ku meelgaarka dhul demanyaale ah oo ku fadhiya cabbirka 1792 oo ku yaalla Kismaayo si wafaqsan shurudaha looga baaraandegay qandaraaska.

Muqdisho, 9 Abriil 1959.

Wasiirka

Salaad Cabdi Maxamuud

La hubiyay laga Diiwaangeliyay – Diw. lamba. 16. – bogga lamba. 40.

Muqdisho, 16 Juun 1959.

Hantidhowrka Guud — **Spadaro**